



# Storybooks Canada

[storybookscanada.ca](http://storybookscanada.ca)

Digaag iyo hangararac / La poule et le

millepatte


Written by: Winny Asara

Illustrated by: Magriet Brink

Translated by: (so) Abdi Muse, (fr) Isabelle Duston,

Veronique Biddau

This story originates from the African Storybook ([africanstorybook.org](http://africanstorybook.org)) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.




This work is licensed under a Creative Commons

[Attribution 3.0 International license.](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0)


<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0>



Digaag iyo hangararac  
La poule et le millepatte



✍️ Winny Asara  
👤 Magriet Brink  
📖 Abdi Muse  
🗣️ Somali / French  
📊 Level 3



Digaag iyo Dixiri waxay ahaayeen saaxiibo. Laakiin had iyo jeer waxay ahaayeen kuwo tartamo. Hal maalin waxay go'aansadeen inay ciyaaraan kubadda cagta si ay u arkaan midka ah ciyaaryahanka ugu fiican.

...

La poule et le millepatte étaient amis. Mais ils étaient toujours en compétition l'un contre l'autre. Un jour, ils décidèrent de jouer au football pour voir qui était le meilleur joueur.



Waxay aadeen garoonka kubada cagta waxayna bilaabeen ciyaartooda. Digaagadu waxay ahayd mid dhakhsa badan, laakiin hangararaca ayaa kasii dhakhsa badan. Digaagadu waxay u darbaysay meel fog laakiin hangararaci ayaa u darbeyay meel kasii fog. Digaagadu waxay bilaawday inay dareento xanaaq.

...

Ils allèrent au terrain de football et commencèrent à jouer. La poule était rapide, mais le millipède était encore plus rapide. La poule envoyait le ballon loin, mais le millipède l'envoyait encore plus loin. La poule commençait à être de mauvaise humeur.



Waxay go'aansadeen in ay ciyaaraan gool ku laad.  
Waxaa goolhaye ku hormaray hangaraarici. Digaagtii  
waxay dhalisay hal gool oo kaliya. Kadibna waxay ahayd  
digaaggada markeedi in ay difaacdo goolka.

...

Ils décidèrent de tirer des pénaltys. Au début, le  
millepatte était gardien de but. La poule marqua un seul  
but. Puis ce fut au tour de la poule d'être le gardien de  
but.



Laga soo bilaabo wakhtigaas, digaagga iyo  
hangaraacyaasha waxay is ku ahaayeen cadow.

...

Depuis ce temps, les poules et les millepattes sont  
ennemis.



Hangaraarici wuu darbeyay kubadii waa uu na dhaliyay.  
 Hangaraarici ayaa soo ceyriyay kubada wuuna dhaliyay.  
 Hangaraaraci ayaa madaxa ku soo tuuray kubada wuuna  
 dhaliyay. Hangaraarici waxa uu dhaliyay shan goal.

...

Le millepatte tira dans le ballon et marqua. Le millepatte  
 dribla avec le ballon et marqua. Le millepatte fit une  
 tête avec le ballon et marqua. Le millepatte marqua cinq  
 buts.



Digaagadii waa ay qufacday ilaa ay qufacday  
 Hangaraaricii ku jiray caloosheeda. Hooyadii  
 hangaraaraca iyo ilmaheedi waxay ku guurguurteen  
 geed korkiisa si ay iskugu qariyaan.

...

La poule toussa jusqu'à ce qu'elle recache le millepatte  
 qui était dans son estomac. La maman millepatte et son  
 enfant rampèrent jusqu'à un arbre pour se cacher.



Digaaggadu waxay ka cadhootay in ay guuldareysatay. Waxay ahayd kuuldareyste aad u xun. Hangaraarac waxuu bilaabay in uu qoslo sababtoo ah saaxiibkiisa ayaa ahaa mid sidaas u buuqa.

...


La poule était furieuse d'avoir perdu. C'était était une très mauvaise perdante. Le millepatte commença à rire parce que son amie faisait tout une histoire.



Digaaggadu waa aay daacsatay. Kadibna way liqday oo candhuuf tuftay. Kadibna way hindhistay oo qufacday. Oo qufacday. Hangaraaricii waxuu ahaa karaahiyo!

...


La poule fit un rot. Puis elle déglutit et cracha. Puis elle éternua et toussa. Et toussa. Le millepatte était dégoûtant !



Digaagadii aad ayay u xanaaqday oo waxay aad ukala qaday afkeedi! waxayna liqday hangararicii.

...

La poule était tellement en colère qu'elle ouvrit un large bec et avala le millepattes.



Hooyadii Hangararaca ayaa ku qaylisyay, "Isticmaal awooddaada khasaka ah cunugeyga!"

Hangararacyaasha waxay samayn karaan shiir xun iyo dhadhan daran. Digaagadii waxay bilaawday in ay dareento xanuun.

...


La maman millepatte s'écria « Utilise tes pouvoirs spéciaux mon enfant ! » Les millepattes peuvent faire une mauvaise odeur et donner un mauvais goût. La poule commença à se sentir mal.



Iyadoo digaaggadi u soo socotay guriga, waxay la kulantay hangaraarac hooyadii. Hangaraarac hooyadii baa waydiisay, “Ma aragtay ilmahaygi?” Digaagada waxbo maysan odhan. Hooyadii Hangaraaraca ayaa walwashay.

...

Alors que la poule rentrait à la maison, elle rencontra la maman millepatte. La maman millepatte demanda, « as-tu vu mon enfant ? » La poule ne répondit pas. La maman millepatte était inquiète.



Kadibna Hooyadii Hangaraaraca waxay maqashay cod aad u yar. “Hooyo i caawi!” ayuu ku dhawaaqay codka. Hooyadii Hangaraarac waxay fiirisay agagaarka oo dhageysatay si taxaddar leh. Codka ayaa ka yimid digaaggada dhexdeeda.

...

Puis la maman millepatte entendit une petite voix. « Aide-moi maman ! » Criait la voix. La maman millepatte regarda autour et écouta attentivement. La voix venait de l’intérieur de la poule.